

## Ogeysiiska Bukaanka ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha iyo Qorshooyinka Qiimo dhimista Lacag bixinta

Haddii aadan haysan caymis caafimaad ama aadan ku jirin qaar kamid ah caymisyada aadna ka walwalsan tahay inaadan awoodi doonin inaad lacagta daryeelka si guud u bixiso, waxaa laga yaabaa inaan awoodno inaan ku caawino.

Waxaan kugu soo dhaweyneynaa inaad la xariirto mid kamid ah la-taliyaasheena dhaqaalaha si aad u oggaato in qoyskaagu u qalmo barnaamijka kaalmada dhaqaalaha ama qorshooyinka qiimo dhimista lacag bixinada. U qalmida labada dookhba waxaa lagu go'aamiyaa xaalada baahiyaha iyo dakhliga qoyskaaga. Sidoo kale waxaa u qalmi kara qaar kamid ah shaqsiyaadka kujira caymiska ee leh kharashaadka caafimaadka ee aadka u sareeya.

## Himiladeena



Si aan usoo celino, u joogteyno oo aan u kobcino awooda caafimaadka iyo kobaca caruurta ayadoo loo maraayo daryeel, waxbarasho, cilmi-baaris iyo u doodid heer sare ah.

## Waxaan Halkaan u Joognaa inaan ku Caawino!

Waan ku faraxsanahay himaldeena si aan u bixino daryeel tayo sare leh oo ay helaan dhamaan caruurta qaba baahiyaha. La hadal maanta mid kamid ah lataliyaasheena dhaqaalaha ee soo dhaweynta leh si aad u oggaato in qoyskaagu buuxiyay shuruudaha u qalmida dhaqaalaha si aad qaybgasho barnaamijka kaalmada dhaqaalaha ama mid kamid ah qorshooyinkeena qiimo dhimista lacag bixinta.

Facebook:/radychildrens
Instagram iyo Twitter: @radychildrens
Vimeo: /rchsd

Rady Children's

Ku dir codsiyada aad buuxisay:

3020 Children›s Way, MC 5055, San Diego, CA 92123-428

858.966.4005 | Booqo barta oonleenka ah ee http://www.rchsd.org/patients-visitors/financial-assistance.

7/21

# Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha iyo Qorshooyinka Qiimo dhimista Lacag bixinta



**hal-abuur**

wuxuu qayb ka yahay marxalad kasta

Rady Children's

# hal-abuur

wuxuu qayb ka yahay marxalad kasta



## Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha

Rady Children's Hospital-San Diego wuxuu daryeelka ugu tayada sareeya siiyaa bukaanada aan u adeegno. Si loo suurtageliyo helitaanka adeegyadeena caafimaadka carruurta, tixgelin gaar ah ayaa la siiyaa qoysaska bukaanka ah ee aadka u nugul, oo ay ku jiraan kuwa aan awoodin inay iska bixiyaan kharashaadka iyo kuwa awoodoodu xadidan tahau aadna ugu adag tahay bixinta kharashka caafimaadka.

Barnaamijka kaalmada dhaqaalaha ee Rady Children's waxay taageeraan bukaanada dakhligoodu hooseeyo, kujira caymiska ama qaar kamid ah caymisyada, aan u qalmin barnaamijka dawlada; iyo sidoo kale aan awoodin inay bixiyaan kharashaadka caafimaadka muhiimka ah ee daryeelkooda marka la eego xaaladooda dhaqaalaha qoyska.

Waxaan aaminsanahay in dhammaan bukaanadeena iyo qoysaska ay tahay in loola dhaqmo si caddaalad ah oo ay ku dheehan tahay xushmad, ayadoon laga eegeyn inay awoodaan inay lacagta iska bixiyaan. U qalmida kaalmada dhaqaalahe ee qoys kasta waa in lagu saleeyo go'aaminta baahida dhaqaalaha. U qalmida waa inaan lagu saleyn qoomiyada, jinsiyada, xaalada dhaqaalaha qoyska, nooca galmada, da'da, jinsiga ama diinta qofku aaminsan yahay.

Waaxdeena La-talinta Dhaqaalaha waxay halkaan u joogtaa inay qoyskaaga ka caawiso xogta ku saabsan caymiska caafimaadka iyo barnaamijka kaalmada dhaqaalaha iyo qorshooyinka lacag bixinta qiimo dhimista, iyo inay ka jawaabto su'aalaha kharashaadka la xariira. Dhammaan la-taliyaasheen dhaqaalaha waxay su'aalahaaga ka dhigi doonaan kuwo qarsoodi ah oo la dhowro.

### *Waa maxay Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha?*

Barnaamijka kaalmada dhaqaalaha wuxuu bukaanada u ogolaanayaa inay helaan adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah oo bilaash ah ama inay ku helaan qiimo jaban marka ay kasoo baxaan qaar kamid ah shuruudaha u qalmida. Rady Children's kuma dalici doono bukaanada u qalma wax ka badan cadadka guud ahaan lagu dalacay sababo la xariira xaalada degdega ah ama daryeelka caafimaadka kale ee muhiimka ah.

### *Yaa u qalma?*

Ka qaybgalayaasha barnaamijka waa inay buuxiyaan qaar kamid ah shuruudaha ilaha iyo dakhliga. Haddii dakhliga qoyskaagu ka hooseeyo 350 boqolkiiba Tilmaamaha Dakhliga ee Saboolnimada Federaalka, waxaad u qalmo kartaa caymis buuxa oo lagu bixinaayo kharashka.1 Haddii dakhliga qoyskaagu u dhaxeeyo 351 iyo 550 boqolkiiba Tilmaamaha Dakhliga ee Heerka Saboolnimada Dawlada dhexe, waxaadna u qalmi kartaa daryeel samafal oo aan buuxin. Bukaanada caalamiga ah waxay codsan karaan tixgekinta kaalmada dhaqaalaha ee Rady Children's.

### *Sidee ayaan u codsadaa?*

Si aad u codsato kaalmo dhaqaale, waa inaad buuxiso codsiga kaalmada dhaqaalaha, oo ay ku jiraan xaalada bayaanka dhaqaalaha. Nuqulada codsiga kaalmada dhaqaalaha, xeerka barnaamijka kaalmada dhaqaalaha, xeerka uruurinta iyo kharashaadka ayay dhammaan bukaanadu ku heli karaan Ingiriis, Isbaanish, Tagalog, Fiinaamiis iyo Carabi ayadoon bilaash ah.

Qoysaska bukaanka waxay nuqulo ka codsan karaa Waaxda La-talinta Dhaqaalaha ayagoo u maraya qaababkaan soo socda:

Ayagoo wacaya **858-966-4005**

Ayagoo si toos ah u booqanaya ama codsi boosto ugu diraya: **3020 Children's Way, MC 5055, San Diego, CA 92123**

Ayagoo booqanaya **www.rchsd.org/patients-visitors/financial-assistance**

### *Sidee nidaamka ogeysiisku u shaqeeyaa?*

Marka nidaamka u qalmida la dhameeyo, waxaad warqad ogeysiis ah ku heli doontaa boostadaada. Warqadu waxa ku qornaan doona inaad u qalanto caymiska oo buuxa ama caymiska barkiis. Waxaa laga yaabaa in laguu sheego inaadan u qalmin kaalmo dhaqaale ama in lagaaga baahan yahay macluumaad dheeraad ah si aan u gaarto go'aan.

## Barnaamijyada Dowladda

Rady Children's waxay u doodaa bukaanada dakhliga hoose iyo kuwa aan caymiska kujirin ayagoo ku dhiirigeliya inay codsadaan barnaamijyada kaalmada dawlada. Haddii aadan haysan caymis caafimaad ama aad haysato caymis aan kugu filneyn aadna buuxiso qaar kamid ah shuruudaha, waxaad u qalmi kartaa barnaamijka caymiska caafimaadka ay dawladu maalgeliso sida **Medi-Cal** ama **Adeeyada California Children's**. Waxaan ku faraxsanaan lahayn inaan kaa caawino codsiyada barnaamijyadan.

*1Bukaanada aan caymiska lahayn ee heerkan waxay heli doonaan daryeel lacag la'aan ah, marka laga reebo inay qasab tahay inay bixiyaan qoondada lacagta caymiska sida ku xusan jadwalka qayb bixinta lacagta caymiska ee Rady Children's*